

## BAYAANKA WAKIILKA

Waxaan \_\_\_\_\_ , magacaabayaa \_\_\_\_\_  
(Member's name) (Representative's name)

inuu noqdo wakiilkayga arrimaha la xidhiidha diiwaan gelintayda iyo xubinimadayda qorshayaasha caafimaadka UCare sida hoos lagu sharaxay. Qofkani wuxuu noqon doonaa wakiilkayga, waxaanan u fasaxay isaga/iyada inuu aniga i matalo ilaa xadka lagu sheegay dukumeentigan si la mid ah sida aan isu matali karo haddii aan joogo. Waxaan wakiilkayga siinayaa awood uu ku sameeyo waxyaalahan hoose anigoo ku calaamadaynaya "Haa." Ku calaamadaynta "Maya" macnaheedu waa in wakiilkayga aan loo ogolayn inuu sameeyo go'aamadaas. Meelaha lagu calaamadiyay "Haa," wakiilkaygu wuxuu yeelan doonaa awooda la sheegay laga bilaabo maalinta aan saxiixo dukumeentigan. Isaga/iyadu waxay sii lahaan doonaan awoodahaas haddii aan awoodi waayo in aan keligay go'aamo gaadho.

Waxaan fahamsanahay in haddii wakiilkaygu aanu ahayn bixiye daryeel caafimaad ama hay'ad kale oo hoos timaada federaalka ama sharciyada gaarka ah ee gobolka, macluumaadkayga sirta ah ee uu helay wakiilkaygu, sida hoos lagu qeexay, in laga yaabo in uu siidaayo wakiilkaygu ogolaanshahayga la'aanteed, lagana yaabo inaysan dhawrin sharciyada qarsoonaanta sirta.

Haa Maya

1. Waxaan u ogolaanayaa wakiilkayga inuu igu qoro qorshaha UCare ee habboon si uu u bixiyo khidmadaha caymiska ee jira; in laga doorto faa'iidada ikhtiyaarka ee hoos yimaada xeerarkaas oo kale; iyo in la raaco dhamaan dacwadaha caymiska isagoo i matalaya.

Haa Maya

2. Waxaan u ogolahay wakiilkayga inuu sameeyo go'aamo khuseeya xubinnimadayda qorshayaasha caafimaadka ee UCare, oo ay ku jiraan beddelka rugteyda daryeelka aasaasiga ah, ka hadlida sheegashooyinka iyo arrimaha la xidhiidha caymiska, iyo ka helidda ama kala hadlista macluumaadka caafimaadka sirta ah ee ku saabsan aniga iyo xaaladayda caafimaad wakiilada UCare. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka ku jira diiwaankayga caafimaadka ay ku jiri karto macluumaadka la xidhiidha cudurrada galmada la isugu gudbiyo, cudurka difaaca dila ee (AIDS), fayraska dila difaaca jirka (HIV), adeegyada caafimaadka habdhaqanka ama dhimirka iyo daaweynta khamriga ama daroogada.

(sii socda)

Haa Maya

3. Waxaan farayaa UCare inay u soo dirto dhamaan warqadaha xubnaha qorshaha caafimaadka UCare wakiilkayga ciwaanka boostada, ee hoos ku yaal. Waxaan rabaa in wakiilkayga uu helo xogta sir ah ee aniga igu saabsan, sida macluumaadka sheegashooyinka. Waxaan fahamsanahay in haddii aan saxo sanduuqa "Haa", wakiilkeygu uu heli doono DHAMAAN agabka xubinta, cusbooneysiinta, ogeysiisyada caymiska, macluumaadka sheegashooyinka, iyo boostada kale isagoo i matalaya. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka ku jira diiwaankayga caafimaadka ay ku jiri karto macluumaadka la xidhiidha cudurrada galmadala isugu gudbiyo, cudurka difaaca dila ee (AIDS), fayraska dila difaaca jirka (HIV), adeegyada caafimaadka habdhaqanka ama dhimirka iyo daaweynta khamriga ama daroogada.

Haa Maya

4. Waxaan u ogolahay wakiilkayga inuu sameeyo go'aamo, dantayda ku wanaagsan, oo ku saabsan ka saarista qorshayaasha caafimaadka UCare.

Haa Maya

5. Wax kale(fadlan sharax): \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_

**Xiriirka kaala dhaxeeya Wakiilka.** Wakiilkaygu waa \_\_\_\_\_  
(xaaskeyga, waalidkeyga, ilmahayga, saaxiibkay, iwm.)

**Waxaan fahamsanahay in markaan saxeexo xagga hoose inaan qof kale siinayo awoodda sharciga ah si uu go'aannada qaarkood u sameeyo isagoo i matalaya. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in UCare ay ku tiirsanaan doonto ogolaanshahan si ay u siiyaan macluumaadka gaarka ah wakiilkayga oo ay isbeddel ku sameeyaan xaaladdayda xubin. Waxaan fahamsanahay inaan ka noqon karo ogolaanshahan wakhti kasta anigoo UCare qoraal ugu sheegaya inaan doonayo inaan sidaas sameeyo. Si kastaba ha ahaatee, waxaan fahamsanahay in ka noqoshadayda ogolaanshahan aysan saameyn doonin tallaabo kasta oo UCare ay qaado, ama xog kasta oo UCare ay horay u sii daysay, iyadoo lagu salaynayo ogolaanshahan ka hor inta aysan UCare dhab ahaantii helin codsigeyga ku aaddan ka noqoshada.**

Waxaan fahamsanahay in UCare aysan shuruud ku xidhin daawaynta, bixinta, diiwaangelinta ama u qalmitaanka dheefaha marka la fulinayo foomkan.

(sii socda)

Si uu u hirgalo, dukumeentigan waa in la buuxiyaa oo aan saxeexaa oo aan ku aqbalo hoos wakiilkayga. Ogolaanshahani waxa uu dhacayaa hal sano laga bilaabo taariikhda saxeexa haddii wakiilkaygu uu qabanayo hawlaha soo socda isaga oo i matalaya: racfaan, diidmo, go'aaminta caymiska ama go'aaminta ururka; go'aan laga gaaray ogolaanshaha ama lacag bixinta daryeelka caafimaadka.

Saxeexa dhinaca raadinaya matalaadda: \_\_\_\_\_

Taariikhda la saxeexay: \_\_\_\_\_ Lambarka taleefanka: \_\_\_\_\_

Ciwaanka: \_\_\_\_\_ Taariikhda dhalashada: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Lambarka xubinka UCare: \_\_\_\_\_

Haddii aanan muuqaal ahaan magacayga ku saxeexi karin foomkan. Waxaan weydiisan karaa qof inuu ii saxiixo.

Magaca daabacan ee qofka aan weydiisto inuu ii saxiixo: \_\_\_\_\_

Saxeexa qofka aan weydiisto inuu ii saxiixo: \_\_\_\_\_

**AQBALAADA WAKIILKA:** (waa inuu buuxiyaa wakiilku)

Shakhsiga hoose, ee loo magacaabay wakiil sida ku xusan dukumeentigan, wuxuu aqbalayaa magacaabista wakiilka la magacaabay, iyadoo la raacayo shuruudaha dukumeentiga.

Magaca daabacan: \_\_\_\_\_

Saxeexa: \_\_\_\_\_

Taariikhda la saxeexay: \_\_\_\_\_

Ciwaanka: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Lambarka taleefanka: \_\_\_\_\_

Kusoo celi foomka la buuxiyay: UCare PO Box 52 Minneapolis, MN 55440-0052

Fax: 612-676-6501 | Email: [CLSScanReqInq@ucare.org](mailto:CLSScanReqInq@ucare.org)

**Toll free 1-800-203-7225, TTY 1-800-688-2534**

Attention. If you need free help interpreting this document, call the above number.

ያስተውሉ፡ ካለምንም ክፍያ ይህንን ዶኩመንት የሚተረጎምሎ አስተርጓሚ ከፈለጉ ከላይ ወደተጻፈው የስልክ ቁጥር ይደውሉ።

ملاحظة: إذا أردت مساعدة مجانية لترجمة هذه الوثيقة، اتصل على الرقم أعلاه.

သတိ။ ဤတွဲရက်စာတမ်းအားအခမဲ့ဘာသာပြန်ပေးခြင်း အကူအညီလိုအပ်ပါက၊ အထက်ပါဖုန်းနံပါတ်ကိုခေါ်ဆိုပါ။

កំណត់សំគាល់ ។ បើអ្នកត្រូវការជំនួយក្នុងការបកប្រែឯកសារនេះដោយឥតគិតថ្លៃ សូមហៅទូរសព្ទតាមលេខខាងលើ ។

請注意，如果您需要免費協助傳譯這份文件，請撥打上面的電話號碼。

Attention. Si vous avez besoin d'une aide gratuite pour interpréter le présent document, veuillez appeler au numéro ci-dessus.

Thov ua twb zoo nyeem. Yog hais tias koj xav tau kev pab txhais lus rau tsab ntaub ntawv no pub dawb, ces hu rau tus najnpawb xov tooj saum toj no.

ဟ်သူဉ်ဟ်သးဘဉ်တက့ၢ်. ဖဲနမ့ၢ်လိဉ်ဘဉ်တၢ်မၤစၤကလီလၢတၢ်ကကျိးထံဝဲဒဉ်လံာ် တီလံာ်မိတခါအံၤန့ၢ်, ကိးဘဉ် လိတဲစိနီၢ်ဂံၢ်လၢထးအံၤန့ၢ်တက့ၢ်.

알려드립니다. 이 문서에 대한 이해를 돕기 위해 무료로 제공되는 도움을 받으시려면 위의 전화번호로 연락하십시오.

ໂປຣດຊາບ. ຖ້າຫາກ ທ່ານຕ້ອງການການຊ່ວຍເຫຼືອໃນການແປເອກະສານນີ້ຟຣີ, ຈົ່ງ ໂທໂປຣໂປຊາບເລກຂ້າງເທິງນີ້.

Hubachiisa. Dokumentiin kun tola akka siif hiikamu gargaarsa hoo feete, lakkoobsa gubbatti kenname bilbili.

Внимание: если вам нужна бесплатная помощь в устном переводе данного документа, позвоните по указанному выше телефону.

Digniin. Haddii aad u baahantahay caawimaad lacag-la'aan ah ee tarjumaadda (afcelinta) qoraalkan, lambarka kore wac.

Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para interpretar este documento, llame al número indicado arriba.

Chú ý. Nếu quý vị cần được giúp đỡ dịch tài liệu này miễn phí, xin gọi số bên trên.

## CB5 (MCOs) (5-2020)

### Ogeysiiska Xuquuqda Madaniga ah

Takoorku Wuxuu Kasoo horjeeda Sharciga. UCare kuma takoorto midna kuwa soo socda:

- Isirka
- Midab
- wadanka aad kasoo jeedo
- caqiido
- diin
- Nooca galmada
- heerka kaalmada dadweynaha
- da'
- naafanimo (ay ku jirto naafanimada jirka ama maskaxda)
- jinsiga (oo ay ku jiraan fikradaha qaldan ee jinsiga khuseeya iyo aqoonsiga jinsiga)
- xaalada guur ahaaneed
- aaminsanaanta siyaasadeed
- xaalada caafimaad ahaaneed
- xaaladda caafimaad
- helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka
- sheegasho waayo-aragnimo
- taariikhda caafimaadka
- macluumaadka hidaha

**Caawinta iyo Adeegyada Caawimaad ah.** UCare waxay bixisaa caawimo iyo adeegyo caawimo ah, sida turjubaano u qalma ama macluumaad qaabab la heli karo, lacag la'aan iyo wakhti ku haboon, si loo hubiyo in fursad loo siman yahay oo lagaga qayb qaato barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka. **Kala xiriir** UCare 612-676-3200 (cod ahaan) ama 1-800-203-7225 (cod ahaan), 612-676-6810 (TTY), ama 1-800-688-2534 (TTY).

**Adeegyada Caawinta Luuqadda.** UCare waxay bixisaa dukumeenti la turjumay iyo tarjumaada luuqada lagu hadlo, lacag la'aan iyo hab ku haboon, marka adeegyada kaalmada luuqadu ay lagama maarmaan tahay si loo hubiyo in dadka ku hadla Ingiriisiga xaddidan ay si wax ku ool ah u helaan macluumaadka iyo adeegyadayada. **Kala xiriir** UCare 612-676-3200 (cod ahaan) ama 1-800-203-7225 (cod ahaan), 612-676-6810 (TTY), ama 1-800-688-2534 (TTY).

### Cabashada Xuquuqda Madaniga ah

Waxaad xaq u leedahay inaad xarayso cabasho takoorid haddii aad aaminsan tahay in UCare laguula dhaqmay si takoor ah. Waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa mid ka mid ah afartan wakaaladood ee soo socda si aad u xarayso cabashada takoorka.

### Xafiiska Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka ee Xuquuqda Madaniga (OCR)

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso OCR, oo ah wakaalad federaal ah, haddii aad aaminsantahay in lagugu takooray mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Isirka
- Midab
- wadanka aad kasoo jeedo
- da'
- naafo
- jinsi
- diin (xaaladaha qaar)

Kala xiriir **OCR** si toos ah si loo xareeyo cabasho:

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka  
Xafiiska Xuquuqda Madaniga  
200 Independence Avenue SW  
Room 515F  
HHH Building  
Washington, DC 20201  
Xarunta Jawaabta Macmiilka: Khad bilaash ah: 800-368-1019  
TDD 800-537-7697  
Iimeel: ocrmail@hhs.gov

### **Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota (MDHR)**

Minnesota gudaheeda, waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso MDHR haddii aad aaminsantahay in lagugu takooray mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Isirka
- Midab
- wadanka aad kasoo jeedo
- diin
- caqiido
- jinsiyada
- Nooca galmada
- xaalada guur ahaaneed
- heerka kaalmada dadweynaha
- naafonimo

Si toos ah ula xiriir **MDHR** si aad u xareeyso cabasho:

Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota  
540 Fairview Avenue North  
Suite 201  
St. Paul, MN 55104  
651-539-1100 (cod)  
800-657-3704 (khadka bilaashka ah)  
711 ama 800-627-3529 (MN Relay)  
651-296-9042 (Fax)  
Info.MDHR@state.mn.us (Iimeel)

### **Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS)**

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso DHS haddii aad aaminsantahay in lagugu takooray barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Isirka
- Midab
- wadanka aad kasoo jeedo
- caqiido
- diin
- Nooca galmada
- heerka kaalmada dadweynaha
- da'
- naafonimo (ay ku jirto naafanimada jirka ama maskaxda)
- jinsiga (oo ay ku jiraan fikradaha qaldan ee jinsiga khuseeya iyo aqoonsiga jinsiga)
- xaalada guur ahaaneed
- aaminsanaanta siyaasadeed
- xaalada caafimaad ahaaneed
- xaaladda caafimaad
- helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka
- sheegasho waayo-aragnimo
- taariikhda caafimaadka
- macluumaadka hidaha

Cabashooyinka waa in ay qoraal ahaadaan oo lagu xereeyaa 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda aad ogaatay takoorka lagu eedeeyay. Cabashada waa inay ku jirtaa magacaaga iyo cinwaankaaga oo ay qeexdaa takoorka aad ka cabanayso. Kadib markaan helno cabashadaada, waanu dib u eegis ku samayn doonaa waxaan qoraal kugu ogaysiin doonaa haddii aanu awood u leenahay inaanu baadho iyo in kale. Haddii aan sameyno, waxaan baari doonaa cabashada.

DHS ayaa qoraal kugu ogaysiin doonta natiijada baadhista. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadata natiijada haddii aadan ku raacsanayn go'aanka. Si aad rafcaan u qaadata, waa inaad soo dirtaa codsi qoraal ah si ay DHS dib u eegto natiijada baarista. Si kooban u qeex oo sheeg sababta aad u diidan tahay go'aanka. Ku dar macluumaad dheeraad ah oo aad u malaynayso inay muhiim tahay.

Haddii aad dacwad u gudbisno habkan, dadka u shaqeyda wakaaladda ku magacaaban cabashada kama aargoosan karaan. Tani waxay la macno tahay inaysan sinaba kuugu ciqaabi karin cabashada aad gudbisay. Cabashada habkan kama joojinayso inaad raadiso tallaabooyin kale oo sharci ama maamul ahaaneed.

Si toos ah ula xirii **DHS** si aad u xerayso cabasho:

Isuduwaha Xuquuqda Madaniga  
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota  
Fursadaha Loo Siman Yahay iyo Qaybta Helitaanka  
P.O. Box 64997  
St. Paul, MN 55164-0997  
651-431-3040 (cod) ama isticmaal adeega gudbinta ee aad door bidayso

### **Ogaysiiska Cabashada UCare**

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbisno UCare haddii aad aaminsantahay in lagugu takooray barnaamijyadaya daryeelka caafimaadka mid ka mid ah kuwan soo socda:

- xaaladda caafimaad
- helitaanka adeegyada
- daryeelka caafimaadka
- khibradaha sheegashooyinka
- taariikhda caafimaadka
- macluumaadka hidaha
- naafanimo (ay ku jirto naafonimada dhimirka ama jirka)
- xaalada guurka
- da'da
- jinsiga (oo ay ku jiraan fikradaha qaldan ee jinsiga khuseeya iyo aqoonsiga jinsiga)
- Nooca galmada
- wadanka aad kasoo jeedo
- Isirka
- Midab
- diin
- caqiido
- Caawinta dadweynaha heerka
- aaminsanaanta siyaasadeed

Waxaad xereyn kartaa cabasho oo aad weydiisan kartaa caawimaad si aad u xerayso cabashada shaqsi ahaan ama boostada, taleefan, fakis, ama iimayl ahaan:

### **UCare**

Ujeedo: Rafcaannada iyo Cabashooyinka

PO Box 52

Minneapolis, MN 55440-0052

khad bilaash ah: 1-800-203-7225

TTY: 1-800-688-2534

Fax: 612-884-2021

lIMEEL: cag@ucare.org